

Soonka xilliga bisha ramadan

QODOBADA SALDHIGGA U AH CAAFIMAADKAAGGA

Waxaan aad u fahamsannahay inaad donaysid gudashada waajibaadkaaga diiniga ee soonka bisha Ramadan ee kariimka. Laakiin waad jiran karta waqtiga ramadanka ama daawaa kuu socon karta. Dhakhtarka ama takhasusaha wuxu si fiican u miisaamaya waxa caafimaadkaaga muhiim u ah. Xataa shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka, sida takhasusaha cuntada, kalkaaliyaha xaafada ama takhtarka ilkaha, way go'aamin karaan. Sidaas darteed, waxay si weyn kugula talinayaan inaad ku dhaqantid qodobadan hoos ku xusan (waad qalleyn karta ayaamahaadan Soomin wagti kale).

- O 1 Waa u muhiim caafimaadkaaga inaad maalintii cunnadada gaarka qaadatid.
- O 2 Waa u muhiim daweyntaada inaad maalin walba dawooyinkaaga isticmaashid.
- O 3 Waxa aad u muhiima in aad la socotid baaritaanka caafimaad kaaga.
- O 4 Haddaad naas nuujisid waa u muhiim caafimaadkaaga iyo kan cunugaba inaad cabitaan iyo cunno kugu filan maalinimada jooqteysatid.
- O 5 Si loo dhowro fiicnaanta ilkaha waxaa muhiim ah inaad la socotid waqtiga ramadanka daaweynta iyo xannaaneynta ilkahaaga. Halkaasna ugama baahnid inaad wax liqidid ama jirkaaga wax galaan
- O 6 Si loo ilaaliyo fiicnida ilkaha (siiba kuwa caruurta) waa muhiim nadiifinta ilkuhu ugu yaraan labo jeer maalintii in lagu cadaydo daawada cadeyga ay ku jirto flooriid, ka dibna biyo lagaga luqluqdo.

talooyinkan kore waxay ku dhisan yihiin suuradda Quraanka soo socota iyo Axaadiista Nabiga :

Waa bisha Soon ee la soo dajiyey dhexdiisa Quranka, isagoo hanuun Dadka u ah, iyo caddayn hanuun iyo kala bixin (xaqa iyo baadhilka) ee ruuxii jooga (nagi) ha Soomo, ruuxiise buka ama safar ah waxaa saaran maalmo kale, wuxuu idinla dooni Eebe fudayd ee idin lama doonayo culays, waana inaad dhamaystirtaan tirada wayneysaanna Eebewuxuu idinku hanuuniyey, waxaadna dhawdhiin, mudantihiin inaad mahadisaan Eebe (suurat Al-Baqarah, aayadda 185).

Marka hore: Kuwa loo oggolyahay inay afuraan laguna waajibinnin inay qalleeyaan, waxa weeye: Odayga duqa iyo haweyney waayeel ah, qof jirran aan rajo laga qabin inuu bogsado. Hasa yeeshee waxa loogu fasaxay dhammaan inay afuraan haddii Soonku dhib culus ku yahay. Haddaba waxa u dhigma fasaxidaas inay quudiyaan maalintayna soomin hal qof oo ka mida masaakiinta dalkaas, ayna ku afuriyaan wuxuu ku dhergo maalin.

Marka labaad: Kuwa loo fasaxay soonka inay jabiyaan qalluhuna ku waajibay, waa:....kan jirran ee rajo laga qabo inuu ka bogsado xanuunka. oggolaashaha ka afurista Soonkiisana waxa u sugnaaday laba qodob:

- a Waxa isaga u bannaan inuu afuro isagoo qallayn doona Soonka markuu jirrada ka bogsado, hadduu Soomo isagoo jirran waxay sababaysa dhibaato culus ama jirrada oo ku xumaata amase bogsashada oo dib ugadaahda.
- b Qofku waa inuu soonka jabiyaa isagoo qallayn doona markuu bogsado, hadii soonku u keenayo khatar naftiisa ama uu uga imanayo dhibaato weyn caafimaadkiisa dhaawacaya ama waayo aragnimo lagu garanayo ama akhbaar uu bixiyey dhakhtar lagu kalsoon yahay (Sahih Al-Boechari en Sahih Al-Moeslim).

Ibn Cumar wuxu qooyey gabal maro ah wuxuna saaray korkiisa isagoo Soomman.

Ibn Cabbaas wuxu yiri: Wax dhib ah kuma sugna hadduu qofku dhadhamiyo cunto ku karsamaysa digsi.

Iyo Xasan oo yiri: Wax dhibaato ah kuma jirto hadduu qofka Soommani afka biyo ku qooyo kuna qabowsado. (waa la soo wariyey)